



# Munaasabadaha Tallaalka COVID-19 ee Loo Meeleeyey Harrison Park

18 ka Juun, 2021

Qoysaska Harrison Park ee Sharafta Leh,

Waxa aanu doonaynaa inaanu hubino inaad wax ka ogaato fursadaha soo socda ee lagu helayo tallaalka COVID-19. Jaamacadda Caafimaadka & Sayniska ee Oregon, oo la shaqaynaya saaxiibada bulshadeena, ayaa qaban doonta laba munaasabadood oo tallaal ah.

- **Waxa uu yahay:** Xaddiga koowaad ee tallaalka Pfizer waxa loogu talagalay dadka waaweyn iyo carruurta ah da'da 12 iyo wixii ka weyn. Ballan xaddiga labaad ah waxa lagu qaban doonaa goobta dhexdeeda.
- **Goobta:** Dugsiga Harrison Park K-8, 2225 SE 87<sup>th</sup> Ave.
- **Taariikhda:** Isniinta, 21 ka Juun, 3-7 g.d., ballan in la qabtaa muhiim maaha.
- **Xaddiga Labaad:** Isniinta, 12 ka Julaay, 3-7 g.d.
- **Qiimaha:** Tallaalku gebi ahaanba waa bilaash.

Shaqaale laba luuqadood ku hadla ayaa goobta joogi doona si ay u caawiyaan qoysaska ku hadla Soomaali, Kaantooniis, Fiitnaamiis, Isbaanish iyo Juukiis. Uma baahnid inaad soo bandhigto aqoonsiga Oregon, maclumaadka caymiska ama lambarka amniga bulshada, umana baahnid inaad noqoto bukaan OHSU ah. Sidoo kale, kuwa qaata xaddiga koowaad waxa ay heli doonan kaadh hadiyadeed oo qiimihisu \$100 yahay iyo hadiyad uu ka helo Portland Trail Blazers – garan, sawir-dhejis oo qurxineed ama tikidh uu ku tago ciyaar is-diyaarin ama tababar ah oo 2021-22 ah.

Munaasabadda waxa wada kafaala qaaday Dugsiyada Dadweynaha Portland, Shabakadda Maraykanka ee Baasifigga Aasiya ee Oregon (APANO), Xarunta Caafimaadka & Adeegyada Reer Aasiya iyo Degmada Jade.

Waxa aanu ku dhiirrigelinaynaa qofkasta oo aan la tallaalin in uu ka faa'iidaysto fursaddan.